




Tusmada Lagu Codsado

Barnaamijyada Caafimaadka,
Nafaqada Wisconsin,
iyo Barnaamijyo Kale



Haddii aad tahay qof naafo ah oo aad u baahantahay macluumaadkan in lagu siiyo qaab kale, sida in aad dooneysid in laguugu turjumo luuqad kale, ama aad qabto wax su'aalo ah oo la xiriira xaquuqdaada iyo waajibaadkaaga, la xiriir wakaaladaada (kafiiri bogga 15) ama wac Member Services (Adeegyada Xubnaha) oo lambarkoodu yahay 800-362-3002. Dhammaan adeegyada luuqada waa kuwo lacag la'aan ah.

Soodhawoow

Madooneysaa in lagaa caawiyo helitaanka caymis caafimaad? Shaki maka qabtaa sida aad u bixineysid qarashaadka adeegyadaada dukaanka bishaan? Madooneysaa in lagaa caawiyo bixinta qarashaadka daryeelka carruurta markaad aadaysid dugsiga, shaqada, ama barnaamijka tababarka shaqada? Madooneysaa in lagaa caawiyo helitaanka shaqo ama dhisida xirfado si aad uqaado talaabadaas labaad e xirfadaada?

Tusmadaan ayaa kuu sheegayso sida aad u codsan kartid barnaamijyada Wisconsin ee dhinacyada caafimaadka, nafaqada, iyo gunooyinka iyo barnaamijyada kale. Qofkasta oo codsada lana ogaado inuu uqalmo wuxuu heliyaa gunooyin ama waxaa laga diiwaangalinayaa barnaamijka.



Daryeelka
caafimaadka



Nafaqada



Daryeelka
carruurta



Shaqada



Mawduucyada

Gunooyinka iyo Barnaamijyada	4
Sida loo Codsado	7
Waxa Aad U baahantahay inaad Codsato	8
Caawimaad iyo Tilmaamo	9
Keenista Cadaynta	10
Waraaqaha Laguusoo Dirir doono	14
Khayraadka Macluumaadka iyo Xariirada	15
Xaqa aad uleedahay Dhagaysi Daacad ah	17
Aruurinta iyo Adeegsiga Macluumaadka iyo Arimaha Sirta ah	20

Gunooyinka iyo Barnamaajiyada

Wisconsin wuxuu leeyahay gunooyinka iyo barnamaajiyada soosocda oo bixinaaya caawimaad dhinacyada caafimaadka, nafaqada, daryeelka caruurta, iyo shaqada ah. Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan barnamijka, booqo:

- www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm.
- <https://dcf.wisconsin.gov/childcare>.
- <https://dcf.wisconsin.gov/w2/parents>.

Waxaa jiri kara ilo kale oo lahehi karo fama ay heli karaan dadka ubaahan caawimaad kabadan gunooyinka iyo barnamaajiyada lagu sheegay tasmadaan. Wac wakaaladaada ama 211 si aad uhesho macluumaad dheeri ah. Kafiiri bogga 15 macluumaadka aad kala xariirayso wakaaladaada.

BadgerCare Plus

BadgerCare Plus wuxuu caawimaad dhanka daryeelka caafimaadka ah siiyaa dadka da'doodu u dhaxayso 0–64 kuwaasoo ah dad danyar ah.

Barnamijka BadgerCare Plus Prenatal Plan

Barnamijka BadgerCare Plus Prenatal Plan wuxuu siiyaa daryeel caafimaad oo la xariira uurka looguna talagalay haweenka uurka leh ee aan xaq u yeelan barnamijka BadgerCare Plus sababo laxariira aqoonsigooda soogalootinimo ama sabab laxariirta inay kujiraan jeelka ama xabsiga.

Badger Care Plus Emergency Services

Badger Care Plus Emergency Services wuxuu caawimaad kooban oo dhanka daryeelka caafimaadka ah siiyaa marmarka qaar dadka aan xaq ulahayn barnamijka BadgerCare Plus sababo la xariira aqoonsigooda soogalootinimada ama muwaadinimada laakiin ah dad ubaahan daryeel caafimaad oo degdeg ah.

Family Planning Only Services

Barnamijka Family Planning Only Services wuxuu siiyaa raga iyo haweenka adeegyada qaar oo la xariira xakamaynta dhalmada iyo daawooyin ay uga hortagaan uurka aan laqorshayn.

FoodShare

FoodShare Wisconsin, oo sidoo kale loo yaqaano SNAP (taasoo utaagan Barnamijka Kaalmaatiga Nafaqada), ayaa kacaawiya dadka danyarta ah inay gataan cuntada ay ugu baahan yihiin caafimaad wanaagsan.

Medicaid for the Elderly, Blind, or Disabled

Medicaid Dadka Waawayn, Indhaha La', ama Laxaadka La' wuxuu siiyaa caawimaad dhanka daryeelka caafimaadka ah dadka jira da'da 65 sano ama kasii wayn, indhaha la', ama naafada ah danyartana ah. Barnamijkaan waxaa kujira qorshayaashaa caawimaada daryeelka caafimaadka ee soosocda:

- Supplemental Security Income (SSI) Medicaid
- Medicaid la xariira SSI
- Medicaid Purchase Plan
- Wisconsin Well Woman Medicaid
- Daryeelka mudada dheer, ayna kujiraan Family Care, Family Care Partnership, IRIS (Include, Respect, I Self-Direct) (Oo ay kujirto, Xushmad, Daryeelka Tooska ah ee Shaqsiga ah), Program of All-Inclusive Care for the Elderly (PACE), Institutional Medicaid, iyo Katie Beckett

Family Care

Family Care wuxuu adeegyada daryeelka mudada dheeri siiyaa dadka waawayn ee jira 65 sano iyo dadka waawayn ee naafada ka ah jirka, kobaca, ama caqliga si ay gurigooda shaqsiga ah ugu noolaadaan markay macquul tahay.

Family Care Partnership

Family Care Partnership wuxuu siiyaa adeegyada mudada, daryeelka caafimaadka, iyo daawooyinka looqoro dadka waawayn ee kawayn 65 sano iyo dadka waawayn ee qaba naafooyinka dhanka kobaca, caqliga, ama jirka si looga caawiyo inay nolo xor ah ugu noolaadaan bulshada dhexdeeda sida ugu macquul san.

Barnaamijka IRIS (Include, Respect, I Self-Direct) (Oo ay kujirto, Xushmad, Daryeelka Tooska ah ee Shaqsiga ah)

IRIS wuxuu usahlaa dadka qaan gaadhay ee jira da'da 18 ama kasii wayn ee ubaahan taageerada mudada dheer inay maareeyaan adeegyadooda shaqsiga ah ee daryeelka mudada dheer.

Program of All-Inclusive Care for the Elderly (PACE)

PACE wuxuu siiyaa daryeelka mudada dheer, caawimaada daryeelka caafimaadka, iyo daawooyinka dhakhtarku uqoro dadka jira 55 sano iyo kasii wayn ee kunool Degmada Milwaukee ama Waukesha.

Institutional Medicaid (isbitaalka, kalkaalisa caafimaadka guriga, xarumaha caafimaadka dhimirka)

Institutional Medicaid wuxuu siiyaa caawimaada daryeelka caafimaadka iyo adeegyada daryeelka mudada dheer dadka kunoolaa xarunta muddo dhan 30 maalin ama kabadan oo iskuxigay ama lafilaayo inay xarunta joogayaan muddo 30 bari ah ama kabadan oo xariir ah.

Katie Beckett Medicaid

Barnaamijka Katie Beckett wuxuu caawimaada daryeelka caafimaadka siyaa caruurta kayar da'da 19 sano jir oo qaba naafada mudada dheer ama baahiyo balaaran oo dhanka caafimaadka kuwaasoo lanool qoyskooda.

Barnaamijyada Kaydadka Medicare

Barnaamijyada Kaydadka ee Medicare waxay kacaawiyaan dadka kadiiwaangashan Medicare inay bixiyaan qarashaadka Medicare qaarkood, ayadoo laga firinaayo awoodooda dhaqaale iyo hantida ay haystaan.

Qualified Medicare Beneficiary

Medicaid ayaa dhiibaysa qarashaadka joogtada ah ee Medicare Qaybta A iyo Qaybta B, caymiska qaybta ah ee Medicare, iyo lacagaha Medicare jarato.

Specified Low Income Medicare Beneficiary

Medicaid ayaa dhiibaysa qarashaadka joogtada ah ee Medicare Qaybta B.

Qualified Individual Group 1 (kuwaasoo sidoo kale looyaqaano Specified Low Income Beneficiary Plus)

Medicaid ayaa dhiibaysa qarashaadka joogtada ah ee Medicare Qaybta B.

Qualified Disabled and Working Individual

Medicaid ayaa bixiya qarashaadka joogtada ah ee Medicare Qaybta A.



SeniorCare

SeniorCare ayaa kacaawiya dhiibista qarashka daawooyinka looqoro dadka jira 65 sano ama kawayn.

Tuberculosis-Related Services Only Benefit

Adeegyada Tuberculosis-Related oo Kaliya Gunooyinka ah waxay dabooshaa adeegyada la xariira xanuunka qaaxada ee dadka laga helay xanuunka qaaxada laakiin aan uqalmin Medicaid.

Caretaker Supplement

Caretaker Supplement waa guno lacag kaash ah lagu siiyo waalidiinta danyarta ah kuwaasoo qaata lacagaha SSI lana nool oo daryeela caruurtooda.

Barnaamijka Wisconsin Shares Child Care Subsidy

Barnaamijka Kaabista Daryeelka Ilmaha Wisconsin Shares wuxuu kacaawiya qoysaska danyarta ah inay dhiibaan qarashaadka daryeelka caruurta si markaas waalidiinta ama daryeelayaasha kale ee caruurtu ku aadan shaqada, dugsiga, ama ay uga qaybgalaan barnaamijyada tababarka shaqada ee la aqoonsan yahay.

Wisconsin Works (W-2)


W-2 waa barnaamij waqti cayiman socda oo siiya caawimaad lacag kaash ah oo kumeelgaar ah iyo adeegyada maaraynta kiiska kaasoo lasiinaayo waalidiinta danyarta ah iyo hawenka uurka leh. Waa barnaamij shaqo oo loogu talagalay dadka waawayn ee doonaaya inay kaqaybgalaan nashaadaadka shaqada.



Sida loo Codsado


Waxaad ka codsan kartaa gunooyinka iyo barnaamijyada oonleen ahaan, taleefanka, boostada, ama adigoo si toos ah ugu taga wakaaladaada. Haddii aad qorto ama kuhadasho luuqad aan ka ahayn Ingiriiska ama Isbaanishka, waxaad u baahan doontaa inaad codsiga dirsato adoo wacaaya wakaaladaada ama gudbinaaya codsiga oo waraaq ah.

Adeegyada caawimaada luuqada, ayna kujiraan turjumaad qoraal ah iyo adeegyada turjumaanka hadalka, waa kuwo lacag la'aan ah. Wac wakaaladaada si ay kuucaawiyaan. Kafiiri bogga 15 macluumaadka aad kala xariirayso wakaaladaada.



Oonleen ahaan: Waxaad kuheli kartaa Kaliya Luuqadaha Ingiriiska iyo Isbaanishka

Booqo access.wisconsin.gov. Dooro qaybta "Apply for Benefits" (Codso Gunoooyinka). Waxaad arki kartaa noocyada gunooyinka caafimaadka, nafaqada, iyo gunooyinka ama barnaamijyada kale ee aad awoodo inaad hesho adoo kafiirinaaya macluumaadka aad bixisay. Waxaad furan kartaa cinwaanka ACCESS si aad uhubiso meesha uu maraayo codsigaagu si oonleen ah.



Taleefonka

Wac wakaaladaada si aad taleefanka oga codsato. Kafiiri bogga 15 macluumaadka aad kala xariirayso wakaaladaada.




Boostada ama Fakiska

Daabaco waraaqda codsiga oo luuqadaada kuqoran.

- **BadgerCare Plus iyo Family Planning Only Services:** Booqo www.dhs.wisconsin.gov/library/F-10182.htm.
- **FoodShare:** Booqo www.dhs.wisconsin.gov/library/F-16019A.htm.
- **Medicaid:** Booqo www.dhs.wisconsin.gov/library/F-10101.htm.
- **SeniorCare:** Booqo www.dhs.wisconsin.gov/library/f-10076.htm.

Raac tilmaamaha kuqoran codsiga si aad udirto codsiga. Haddii aad fakis kudirayso, xaqiiji inaad dirto labada gees ee foomka codsiga.




Si toos ah

Toos ugu tag wakaaladaada, kadibna shaqaale ayaa kaacaawin doona buuxinta codsiga waraaqda ah ama inaad si oonleen ah ucodsato. Kafiiri bogga 15 macluumaadka aad kala xariirayso wakaaladaada.

Waxa Aad Ubaahantahay inaad Codsato

Markaad codsato gunooyinka ama barnaamijyada, waxaa lagaa codsan karaa inaad keento dhamaan macluumaadka soosocda ee qofkasta oo codsiga dirsanaaya. Inaad macluumaadkaan sii diyaarsato markaad codsanayso ayaa kadhigaysa codsigaaga mid fudud oo degdeg ah.



Caawimaad iyo Tilmaamo

Caawimaad Kahel Dadka kale

Qofkasta, sida saaxiib, qof ehel ah, ama dariskaaga, ayaa kaacaawin karaa inaad codsato gunooyinka. Hadaad rabto in qof ama koox ay kaacaawiso codsiga iyo maaraynta gunooyinka, adigga ama maxkamad ayaa loobaahan yahay inay magacawdo shaqsiyadkaas si ay wakiil kaaga noqdaan. Hoos waxaa kuqoran wakiilda loo magacaabi karo inay wakiil kaa noqdaan.

Wakiilada Fasaxa Haysta

Wakiil kasta oo fasax haysta waa qof ama urur aad adigu u wakiilatay inay kaa caawiyaan codiga iyo maaraynta gunooyinkaaga ama barnaamijyadaada.

Waxaad magacaabi kartaa qof kaanoqda wakiil oo fasax haysta adoo buuxinaaya Foomka Appoint, Change, or Remove an Authorized Representative: Person (Qofka Magacaabida, Badalkam ana ja saarida Wakiilka Fasaxa Haysta: Qofka), F-10126A. Booqo www.dhs.wisconsin.gov/library/F-10126.htm kana soodagso foomka.

Waxaad magacaabi kartaa urur kaanoqda wakiil oo fasax haysta adoo buuxinaaya Foomka Appoint, Change, or Remove an Authorized Representative: Organization (Qofka Magacaabida, Badalkam ana ja saarida Wakiilka Fasaxa Haysta: Hay'ada), F-10126B. Booqo www.dhs.wisconsin.gov/library/F-10126.htm kana soodagso foomka.

Wakiilada Kale

Ilaaliyaasha, masuuliyiinta sharciga ah qaarkood sida masuulka sharciga ah ee guriga, iyo awoodaha qaar ee qareenka sida awooda dhaqaale ee qareenka ayaa sidoo kale noqon kara wakiilkaaga kaana caawin kara codsiga iyo maaraynta gunooyinkaaga iyo barnaamijyadaada. Waxaa qasab ah in lawaydiisto inay baxshaan waraaqaha cadaynaaya aqoonsigooda ah inay wakiil kaayihiin.

Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan wakiilada booqo: www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/representative-types.htm.

Waxyaabaha ay Tahay inaad Xasuusnaato markaad Codsiga Dirsanayso

- Barnaamijyadu waxay leeyihiin dhaqaale kala xadi duwan iyo xeerar ugaar ah oo dhanka diiwaangalinta ah. Qaabka kaliya ee aad u oga karto inaad si dhab ah ugu qalanto barnaamijka waa inaad codsataa. Hadaad doonayso inaad aragto inaad xaq uleedahay kahor intaadan codsan, booqo access.wisconsin.gov kadibna dooro "Am I Eligible" (Miyaan Uqalmaa)? Waxaa lagu waydiin doonaa su'aalo si aad u ogaato inaad uqalanto barnaamijka.
- Haddii aad doonayso inaad aragto xadiyada dhaqaalaha uu barnaamijku hadda baxsho, booqo www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm.
- Haddii aad codsanayso barnaamijka FoodShare, waxaa qasab ah inaad waraysi marto. Waxaad waraysiga kugali kartaa taleefanka ama si toos ah adoo utagaaya wakaaladaada. Waxaad wici kartaa wakaaladaada kadib markaad gudbiso codsigaaga si oonleen ah.
- Wixii la xariira Medicaid iyo Caretaker Supplement, waa inaad keentaa macluumaadka hantida maguurtada ah, waxaana lagaa dalban karaa inaad keento cadaynta hantidaas aad leedahay. Soo qaado warbixinta koontadaada bangiga si aad ufududeyso aadna uboobsiiso hawshaada codsiga.



Keenista Cadayn

Kadib markaad codsato gunooyinka ama barnaamijyada, waxaa suuragal ah in lagaa dalbado inaad keento macluumaad dheeraad ah ama cadayn. **Waxaad helayaa waraaq kuu sheegaysa nooca macluumaadka ee aad ubaahan tahay inaad ukeento cadayn** kadib marka wakaaladaadu dib u eegis kusamayso codsigaaga.

Qodobada soosocda waa liiska tusaalayaasha cadaynta. Mararka qaar, wakaaladaada ayaa cadayn kaqaadan karta ilo kale oo macluumaad, umana baahan doontid inaad keento. Haddii aad ubaahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka cadaynta, wac wakaaladaada.

Cadaynta Naafada

- Waraaqda ogolaanshaha oo kasoo baxday Disability Determination Bureau
- Waraaqda aqbalaada ee Maamulka Social Security

Cadaynta Aqoonsiga

- Baasaboorka Maraykanka oo aan Dhicin
- Shatiga darawalnimada gobalka oo aan dhicin ama kaarka aqoonsiga gobalka
- Aqoonsiga dugsiga oo sawir leh
- Aqoonsiga shaqaalaha oo sawir leh
- Kaarka Aqoonsiga qofka kutiirsan milatariga
- Aqoonsiga milatariga ama diwaanka qabyada ah
- Dukumiintiga diiwaangalinta qabiilka ee Native American
- Caruurta kayar da'da 18 ee codsanaaya BadgerCare Plus ama Medicaid, foomka Statement of Identity (Bayaanka Aqoonsiga) oo saxiixan, F-10154 (waxaad la xariiri kartaa wakaaladaada si ay foomkaan kuusiyaan.)
- Aqoonsiga sawirka leh ee U.S. Citizenship and Immigration Services (USCIS)

Waxaad cadaynta kusoo gudbin kartaa appka moobilka MyACCESS, boostada, ama fakiska.

Qaabka ugu fudud ee aad cadayn kusoo gudbin karto waa appka moobilka ee MyACCESS. waxaad kasoo dagsan kartaa appka App Store ama Google Play si lacag la'aan ah. Appka waxaad kuheli kartaa Kaliya Luuqadaha Ingiriiska iyo Isbaanishka.

Midkale/Cadaynta Dheeriga ah ee Aqoonsiga— FoodShare Kaliya

- Shahaadada Dhalashada
- Diiwaanka Dhalashada ee Isbitaalka
- Diiwaanka Korinta
- Jeega Mushaarka ama Risiidka mushaarka
- Buuxinta Application for a Social Security Card (Codsiga Kaarka Social Security), SS-5
- Waraaqaha cadaynta ama xubinimada kaniisada.
- Kaarka diwaangalinta codaynta
- Diiwaanada qoyska (buugaagta maalmaha dhalashada, isirka, ogaysiisyada dhalashada ee wargayska lagusoo qoro, shatiga guurka, waraaqaha taageerada ama furniinka)
- Heshiiska caymiska nolosha
- Aqoonsiga barnaamijka adeegyad kale ee bulshada
- Diiwaanada midawga shaqaalaha ama ururada kale ee ururka ah
- Amarka maxkamada ee badalida magaca

Midkale/Cadaynta Dheeriga ah ee Aqoonsiga— FoodShare iyo Daryeelka Caafimaadka

Diiwanada caafimaadka (shahaadada talaalka, diiwaanada dhakhtarka ama xarunta caafiamadka, biilalka)

Cadaynta Muwaadinimada Maraykanka ee dadka Waawayn iyo Caruurta

- Baasaboorka Maraykanka oo aan Dhicin
- Koobiga la aqoonsan yahay ee taariikhda dhalashada Maraykanka
- Aqoonsiga kaarka Muwaadinka
- Certificate of Citizenship or Naturalization (Muwaadinimada ama Aqoonsiga lasiiyay Qofka Shisheeyaha aha)
- Waraaqaha korinta ilmo aadan dhalin
- Diiwaanada malatariga, diwaanka isbitaalka, diwaanka dugsiga, diwaanka caymiska, diiwaanada kalkaalinta gurigga oo muujinaaya goobta aad Maraykanka uga dhalatay
- Kaarka aqoonsiga Native American ama waraaqaha kale oo ay soosaartay qabiil ay aqoonsantahay dawlada Federaalku

Cadaynta aqoonsiga Soogalootinimada (Haddii aadan aheyn muwaadin Maraykan ah

- Daganaanshaha rasmiga ah ama kaarka "cagaaran"
- Certificate of Naturalization (Aqoonsiga lasiiyay Qofka Shisheeyaha aha)
- Dukumiinti kasta oo ay soosaartay USCIS, nambarka diiwaangalinta qaxootiga ("A"), ama nambarka USCIS

Cadaynta Kamid ahaanshaha Qabiil iyo/ama cadaynta inaad kasoo jeedo Native American ama Alaska Native

- Kaarka diiwanagalinta qabiilka
- Cadaynta ama dukumiintiga qoran ee uu soosaaray qabiilku kaasoo cadaynaaya inaad qabiilka katirsan tahay
- Certificate of Degree of Indian Blood (Shahaadada Cadaynta inaad Leedahay Dhiiga Hindida) ayna soosaareen Bureau of Indian Affairs
- Waraaqaha tirakoobka qabiilka
- Shahaadooyinka dhalashada, caafimaadka, ama diiwaanada kale kuwaasoo cadaynaaya inuu qofku yahay ilmo uudhaay ama ilmo uu awoowe uyahay xubin katirsan qabiilka

- Diwaanada caafimaadka ama waraaqaha kale kuwaasoo muujinaaya in qofku uqalmo, ama uu helay adeegyada uu bixiyay Daryeelaha Caafimaadka Hindiyaan ka ah

Cadaynta Taageerada Ilmaha iyo/ ama Lacagta Waalidku Baxshay ama Helay

- Amar maxkamadeed
- Diiwaanka qarash bixinta ee gobal kale

Cadaynta Hantidaada maguurtada ah

- Bayaanka koontada bangiga
- Sharciga lahaashaha guriga
- Qandaraasyada
- Heshiisyada dhul lahaanshaha
- Diiwaanada dhaqaalaha
- Heshiisyada caymiska nolosha

Cadaynta Mushaarka Shaqada

- Risiidyada mushaaradii lagu siiyay 30 maalin ee ugu danbaysay
- Foomka Employer Verification of Earnings Cadaynta Mushaar bixinta ee Shirkada aad u shaqayso (EVF-E), F-10146 (Waxaad la xariiri kartaa wakaaladaada si aad foomkaan uhsho. Shirkada aad u shaqayso waa inay buuxisaa ayna saxiixdaa foomka: Ku celi foomka labuuxiyay ciwaanka kuqoran foomka.)
- Waraaq uu sooqoray qofka aad ushaqayso (Hadaad doorato waraaqda, waa inay kuqoran yihiin isla macluumaadka kuqoran foomka EVF-E.)

Cadaynta Dhaqaalaha kaasoo gala Ganacsigaaga

- Koobiyada foomamka Canshuurta
- Foomka Self-Employment Income Report, (Warbixinta Dhaqaalaha Kaasoo gala Ganacsigaaga), F-00107, ama foomka Self-Employment Income Report: Farm Business (Warbixinta Dhaqaalaha Kaasoo gala Ganacsigaaga: Ganacsiga Beeraha), F-00219 (Waxaad laxariiri kartaa wakaaladaada si ay foomkan kuusiyaan. Foomamka waxaa kaliya la isticmaalayaa hadaadan wali gudbin canshuuraha ganacsigaaga shaqsiga ah.)

Cadaynta Dhaqaalaha kale ee Kusoo gala

Fiio Gaar ah: Qaar kamid ah tusaalayaasha qarashaadka kale ee kusoo gali kara ayaa kala ah lacagta iskaaga aad kuqaadato, taageerada caruurta, gunada naafada ama qofka xanuunsan mushaarka lasiiyo, lacagta dulsaarta ah ama saamiga kusoo gala, gunooyinka dadka wadanka usoo halgamay, magdhawga shaqaalaha, iyo caymiska shaqo la'aanta.

- Bayaanka lacagta hawlgabka
- Koobiga jeega aad hadda qadato
- Waraaqaha laguugu siiyo Unemployment Compensation (Magdhawga Shaqo La'aanta)
- Waraaqaha furniinka ee muujinaaya heshiiska dhaqaale, ilaalinta, taageerada qoyska, ama taageerada caruurta
- Waraaqaha heshiiska qaybinta ee ay maxkamadu amartay
- Waraaqda laguugu siiyay Social Security
- Waraaqda abaalmarinta Veterans Affairs
- Waraaqda Laguugu siiyay Magdhawga
- Waraaqda abaalmarinta caawimaada dhaqaale
- Diiwaanada canshuurta ee muujinaaya dhaqaalaha aadan wali qaadan
- Waraaqaha ilo kasta oo kale oo dhaqaale
- Cadaynta Kinship Care (Daryeelka ehelnimada), Foster Care (Daryeelka Caruurta aadan Dhalin), ama lacagta lasiiyo Subsidized Guardian (Masuulka Lagu kaabay) qarashka lagu baxsho daryeelaha kumeel gaarka ah (wuxuu noqon karaa cadayn hadal ah ama qoran oo ay bixiso wakaalada difaaca caruurtu)

Cadaynta inaad Dagantahay Wisconsin

- Cadaynta, heshiiska kirada, ama risiidka ama waraaqda kasoo baxda mulkiilaha gurigga oo uu kuqoranyahay ciwaanka aad hadda dagantahay
- Risiidyada daynta guriga oo ay kuqoran yihiin ciwaanka hadda
- Biilka alaabta iyo/ama taleefanka oo kucadyahay cinwaanka aad hadda dagan tahay
- Risiidyada jeega oo uu kuqoranyahay magaca, cinwaanka hadda, iyo cida aad u shaqayso

- Waraaqaha ansixinta barnaamijka caawimaada kirada guryaha
- Waraaqaha ansixinta barnaamijka Hagaajinta cilimiada
- Shatiga darawalnimada ee hadda ee Wisconsin oon dhicin
- Kaarka Aqoonsiga gobalka Wisconsin oo aan dhicin
- Diiwaagalinta hadda ee gaariga aad wadato

Fiio gaar ah: Shaqsiyaadka iyo qoysaska aan lahayn hoyga lagama doonaayo inay keenaan cadaynta meesha ay kunool yihiin laakiin waa inay cadeeyaan inay kunool yihiin gobalka Wisconsin ayna qorshaynayaan inay kusii noolaadaan gobalka Wisconsin.

Cadaynta waxbarashada

- Jadwalka dugsiga
- Kaarka warbixinta

Cadaynta qarashaadka caafimaadka

- Bayaanka biil bixinta ama risiidyada alaabta kuqorantahay
- Kaarka Medicare oo muujinaaya caawimaada Qaybta B
- Heshiiska caymiska caafimaadka oo muujinaaya lacagta joogtada ah, qaybta caymiska, qaybta qarashka, ama lacagta lagaa jaraayo
- Kiniinka dhalada kku jira ee Medicine oo qiimuhu kudul qoran yahay

Cadaynta Canshuuraha Horay Lagaaga goosto

- Risiidyada jeega
- Waraaq kasocota shirkada aad u shaqayso

Cadaynta Canshuuraha Lagaaga goosto

- Risiidyada
- Bayaanka koontada bangiga
- Risiidyada jeega
- Foomamka canshuurta ee sanadkii hore

Cadaynta inaad Awoodin Inaad Daryeesho Ilmo aadna Kaqaybgasho Shaqo La Ogolyahay

Waraaq katimid dhakhtarka jirka, dhakhtarka dhimirka, ama dhakhtarka cilmi nafsiga taaso codsaneyso inaan waalidku awoodin inuu caruurta daryeelo uunan awoodin inuu kaqaybgalo shaqada la ogolyahay

Cadaynta Qarashaadka Kaaga Baxa Daryeelka Caruurta

- Bayaan qoraal ah oo kasoo baxay daryeel bixiyaha caruurta
- Jeega lajoojiyay
- Risiidka mushaarka ama biilka

Cadaynta Qarashaadka Hoyga iyo/ama Alaabta gurigga

- Diiwaanada bixinta qarashaadka daynta gurigga
- Risiidka Kirada
- Bayaan kasoo baxay mulkiilaha guriga
- Heshiiska kirada
- Aqbalaada caawimaada guriyaynta ee HUD
- Bayaanka canshuurta dhismaha
- Biilka alaabta gurigga
- Bayaan kasoo baxay shirkada alaabta gurigga
- Biilka taleefanka
- Heshiiska caymiska ee mulkiilaha guriga ama bayaanka biilka
- WHEAP/LIHEAP ama caawimaad kale oo dhanka tamarta ah



Isticmaal MyACCESS app si aad sawiro uga qaado waraaqaha aadna ugudbiso cadayntaada.

Waraaqaha Laguusoo Diri doono

Kadib markaad codsato, waxaa waraaqo laguugu soo dirayo boostada. Waraaqahaan waxay kuu sheegayaan meesha uu maraayo codsigaaga gunooyinka iyo barnaamijyada iyo hadii wakaaladu ay wax kaa sugaysa adigga. Waxaa suuragal ah in lagaa rabo inaad keento macluumaad dheeri ah, inaad dhamayso shaqo, ama aad cadayn ukeento jawaabahaaga. **Waa muhiim inaad akhrido waraaq kasta oo laguusoo diro.**

Waxaad dooran kartaa inaad waraaqahaaga kuhesho qaab oonleen halkii laguugusoo diri lahaa boostadaada tooska ah. Si aad dookhaan uqaadato, gal ciwaankaaga ACCESS adoo kagalaaya access.wisconsin.gov. Haddii aadan haysan ciwaanka ACCESS, waxaad furan kartaa mid cusub si aad u aragto waraaqahaaga iyo macluumaadka la xariira gunooyinkaaga iyo barnaamijyadaada si oonleen ah.

CDPU
CENTRALIZED DOCUMENT PROCESSING UNIT
PO BOX 5234
JANESVILLE WI 53547 5234

Mailing Date: MM/DD/YYYY

000001

ANNA MEMBER
123 MAIN STREET
ANYTOWN WI 55555

State of Wisconsin

Case #: 1234567890

ABC Consortium
1-234-567-8901 for questions or
to report changes
1-234-567-8901 to fax proof

The State of Wisconsin is an equal opportunity service provider. This letter contains information that affects your benefits. If you need this material in a different format because of a disability or if you need this letter translated or explained in your own language, please call 1-234-567-8901. These services are free.

Notice of Action, Proof and Information

To get or keep **FoodShare and BadgerCare Plus** you need to take action by the due dates listed below. The action you need to provide information by the due dates listed on the next few pages along with example information. If you do not provide the information, you do not provide the proof, or you do not provide the information, your benefits will be denied, decreased, or ended.

To make sure your benefits get processed as quickly as possible, use the information on this notice.

Program(s)	Due Date	Contact Information
FoodShare; BadgerCare Plus	DATE	ABC Consortium Worker: IM Phone #: 1-234-567-8901 Fax #: (123) 456-7890 Use fax #

Case: 1234567890 Date: MM/DD/YYYY

Page X of X

About Your Benefits

This letter tells you about your benefits. If you have a question, please call the agency above. If you would like to get letters like this online instead of by regular mail, please see the Key Contacts at the end of this letter.

Which benefit?	Status of your benefits?
 Health Care	You applied on DATE. Your application was approved for some of the people in your home. To find out who was approved and who was denied, see Your Health Care Benefits page.

If you don't agree with this decision, you have the right to a Fair Hearing. Please see the last page of this letter to learn more. You may also talk with the agency above.

Case: 1234567890 Date: MM/DD/YYYY

Page X of X

Ilaaha Macluumaadka iyo Xiriirada

Gunooyinka iyo Barnamaajiyada

Degmadaada ama wakaalada qabiilkaaga ayaa kajawaabi karta su'aalaha kusaabsan gunooyinka iyo barnamaajiyada, kaacaawin karta codsiga, kuu sharixi karta shuruucda diiwaangalinta, kaana caawin karta buuxinta waraysigaaga FoodShare.

Wakaaldaha degmada ee gobalka Wisconsin waxay ukala qaybsan yihiin 11 kooxood oo kala duwan. Kooxahaan wakaaladaha ah ayaa loo yaqaanaa urur.

Waxaa sidoo kale jira sagaal wakaaladood oo qabiilo leeyihiin Wisconsin. Haddii aad tahay xubin katirsan qabiil, la xariir wakaalada qabiilkaaga. Haddii aan qabiilkaagu lahayn wakaalad

qabiil, wac wakaalada kutaala degmada aad kunooshahay.

Shaxda soosocota waxaa kuqoran liiska ururada iyo qabaalka oo siday xuruuftu u kala horeeyaa ah la iskugu xijiyay waxaana kuqoran taleefan nambarka urur kasta ama qabiil kasta iyo sidoo kale degmada ay joogaan urur kasta. Wac nambarka ururka ugu wayn si aad ula hadasho wakaaladaada. Tusaale, haddii aad kunooshahay Degmada Green Lake, waxaad wacaysaa 888-256-4563.

Bad River Band of Lake Superior Tribe of Chippewa Indians	715-682-7127
Bay Lake	888-794-5747
- Brown - Door - Marinette - Oconto - Shawano	
Capital	888-794-5556
- Adams - Columbia - Dane - Dodge - Juneau - Richland - Sauk - Sheboygan	
Central	888-445-1621
- Langlade - Marathon - Oneida - Portage	
East Central Income Maintenance Partnership	888-256-4563
- Calumet - Green Lake - Kewaunee - Manitowoc - Marquette - Outagamie - Waupaca - Wausara - Winnebago	
Forest County Potawatomi Community	715-478-4433
Great Rivers	888-283-0012
- Barron - Burnett - Chippewa - Douglas - Dunn - Eau Claire - Pierce - Polk - St. Croix - Washburn	
Lac Courte Oreilles Band of Lake Superior Tribe of Chippewa Indians of Wisconsin	715-634-8934
Lac du Flambeau Band of Lake Superior Tribe of Chippewa Indians	715-588-4235
Menominee Indian Tribe of Wisconsin	715-799-5137

MILES	888-947-6583
Milwaukee	
Moraine Lakes	888-446-1239
- Fond du Lac - Ozaukee - Walworth - Washington - Waukesha	
Northern	888-794-5722
- Ashland - Bayfield - Florence - Forest - Iron - Lincoln - Price - Rusk - Sawyer - Taylor - Vilas - Wood	
Oneida Nation	800-216-3216
Red Cliff Band of Lake Superior Chippewa	715-779-3706
Sokaogon Chippewa Community	715-478-3265
Southern	888-794-5780
- Crawford - Grant - Green - Iowa - Jefferson - Lafayette - Rock	
Stockbridge-Munsee Community	715-793-4032
Western Region for Economic Assistance	888-627-0430
- Buffalo - Clark - Jackson - La Crosse - Monroe - Pepin - Trempealeau - Vernon	
Wisconsin's Kenosha Racine Partnership (WKRP)	888-794-5820
- Kenosha - Racine	

Adeegyada Daryeelka Caafimaadka

Wixii su'aalo ah oo la xariira adeegyada ay bixiso BadgerCare Plus iyo Medicaid, kawac Member Services (Adeegyada Xubnaha) 800-362-3002.

SeniorCare

Wixii su'aalo ah oo la xariira SeniorCare, wac laynka tooska ah ee Adeegga Macaamiisha SeniorCare oo ah 800-657-2038.

Haddii aad tahay qof wayn ama aad tahay qof naafo ah, wakaaladaada deegaanka iyo xarunta adeegyada (ADRC) ayaa macluumaad kaasiin kara tiro badan oo barnamijyo iyo adeegyo ah kaana caawin kara inaad fahanto dookhyada kala duwan eedaryeelka mudada dheer ee aad heli karto. Si aad uhesho macluumaadka adeeggaaga ADRC, booqo barta www.FindMyADRC.com.

Xaqa aad uleedahay Dhageysi Cadaalad ah

Markasta oo ladiido gunooyinkaaga, layareeyo, ama lajoojiyo aadna aaminsantahay in wakaaladaadu khalad samaysay, la xariir wakaalada. Haddii aan wakaaladaadu ogolaan inay khalad gashay, waxaad kadalban kartaa dhaqaalaha wakaalada inuu kaacaawiyo codsiga shirka dhagaysiga dacwada kahor iyo dhagaysiga cadaalada ah.

Shirka Dhagaysiga dacwada Kahor

Waxaa suurtagal ah inaad heshiis lagaarto wakaalada doo maraaya shirka kahoreeya dhagaysiga dacwada adoon sugin dhagaysiga cadaalada ah in laqabto. Marka kulanka laqabto, waxaad fursad u haysaa inaad sheegto doodaada.

Wakaaladaada ayaa sharxi doonta sababta ay talaabada ugaaday. Haddii ay wakaaladu ogaato inay khalad gashay, waxay badali doontaa go'aankeeda waxayna qaadanaysaa talaabo sixitaan ah. Haddii wakaaladaadu go'aansato in go'aankeedii hore sax ahaa aadna wali qabto in wakaaladu khaladan tahay, waxaad xaq uleedahay inaad dalbato dhagsi cadaalad ah.

Fiiro gaar ah: Inaad aqbasho shirka kahoreeya dhagaysiga dacwada macnaheedu maaha inaad xaq ulahayn dhagaysi cadaalad ah. Waxaad dalban kartaa dhagaysi cadaalad ah, haddii aad ku qanacdo talaabooyinka lagu qaaday shirka kahoreeya dhagaysiga dacwada, waxaad joojin kartaa dhagaysigaaga cadaalada ah.

Dhagaysi Cadaalad ah

Dhagaysiga cadaalada ah wuxuu fursad kuusiinayaa inaad usheegto madaxa dhagaysiga dacwada sababta aad u aaminsantahay in go'aanka laga qaatay codsigaaga uu yahay mid khaladan. Inta dhagaysigu socdo, madaxa dhagaysiga dacwada ayaa kudhagaysan doona sidoo kalana dhagaysan doona wakaalada si uu u ogaado in go'aanku ahaa mid sax aha ama mid khaladan. Waxaad usoo kaxaysan kartaa saaxiib ama qof qoyskaaga kamid ah markaad dhagaysiga u imaanayso. Waxaad sidoo kale heli kartaa caawimaad sharci oo bilaash ah. Kafiiri qaybta Caawimaada Sharciga ee kuqoran bogga 19 si aad uhesho macluumaad dheri ah.

Marka ay Tahay inaad Adeegsato Hanaanka Dhagaysiga Cadaalada ah

Tusaalayaasha xiliyada aad codsanayso dhagaysiga cadaalada ay waxaa kamid ah:

- Markaad aamin santahay in codsigaaga si cadaalad daro ah loodiiday ama khalad kujirto.
- Gunooyinkaaga lajoojiyo, layareeyo, ama hakiyay, aadna qabto inay khalad tahay.
- Aadan waafaqsanayn cadadka gunooyinka lagu siiyo.
- Aan codsigaaga waxba laga qaban muddo 30 maalmood gudahood ah.

Si taxadar leh u akhri waraaq kasta oo aad hesho si ay kaaga caawiso fahanka talaabada laqaaday. Haddii sababta isbadalka lagu sameeyay gunadaada ay tahay isbadal kuyimid sharciga federaalka ama gobalka, Division of Hearings and Appeals lagama doonaayo inay kuuqabato dhagaysi cadaalad ah.

Sida Loocodsado Dhagaysi Cadaalad ah

Kacodso wakaaladaada inay kaacaawiso gudbinta codsiga dhagaysi cadaalad ah, ama si toos ah qoraal ugu dir:

Department of Administration
Division of Hearings and Appeals
PO Box 7875
Madison, WI 53707-7875

Waxaad foomka Fair Hearing Request (Dalabka Dhagaysiga Cadaalada ah) ka haysaa oonleen ahaan barta www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm ama adoo waca nambarka 608-266-7709.

Haddii aad doorato inaad waraaq qorto badalkii foomka, waxaa qasab ah inaad kudarto macluumaadka soosocda:

- Magacaaga
- Ciwaankaaga Boostada
- Sharaxada kooban ee cilada aad ka cabanayso

- Magaca wakaalada talaabada qaaday ama diiday adeegga
- Nambarkaaga Social Security
- Saxiixaaga

Wixii la xariira FoodShare, wakaaladada ayaa codsiga si hadal ah kaaga qadi karta.

Wixii laxariira daryeelka caafimaadka, codsiga dhagaysiga cadaalada ah waa in ladiraa ugu danbayn 45 maalin kadib maalinta laqaaday talaabada aad racfaanka ka qaadanaysid. Wixii la xariira FoodShare, codsiga waa in ladiraa ugu danbayn 90 maalin kadib maalinta laqaaday talaabada aad racfaanka kaqadanayso. Waxaad codsan kartaa dhagaysi dacwadeed xiligaad rabto intaad qaadanayso gunooyinka FoodShare hadadan ku qancin cadadka gunada lagu siiyo. Waraaqdii ugu danbaysay ee diiwaangalinta ayay kucadaan doontaa taariikhda kama danbaysta ah ee ay qasabka tahay inaad dhagaysiga codsato.

Adigga, wakiilka aad dooratay (haduu jiro), iyo wakaaladaada ayaa heli doona ogaysiis qoran ugu yaraan 10 maalin kahor xiliga dhagaysiga kasoo cadaynaaya waqtiga, taariikhda, iyo goobta dhagaysiga lagu qabanaayo.

Udiyaar Garoowga Dhagaysiga Cadaalada ah

Waxaad xaq uleedahay inaad keento marqaatiyaal, qareenkaaga gaarka ah, ama lataliye kale goobta dhagsiga cadaalada ah. Department of Health Services madhibi doonto qarashka caawimaada sharciga ee lagugu matalaayo, laakiin waxaa suurtagal ah inay awoodaan inay kaacaawiyaan wixii sharci ah oo bilaash ah oo la xariirta su'aalaha ama wakiilka dhagaysiga cadaalada ah.

Waxaad xaq uleedahay inaad dib u eegis kusamayso macluumaad kasta oo kujira gal dacwadeed kaaga kaasoo loo adeegsaday kago'aan gaarista diiwaangalintaada.

Adigga ama wakiilkaaga waxaad xaq u leedihiin:

- Inuu su'aalo waydiiyo qofkasta oo marqaati ka ah dhagaysiga cadaalada ah.

- Inuu keeno doodahaaga shaqsiga ah iyo dukumiintiyada qoran kuwaasoo muujinaaya sababta aad uqabto inaad saxan tahay.
- Inaad keento cadaynta caafimaad ee cadayn ahaan looqaato hadii dhagaysiga cadaaladu kusabaasan tahay inad naafo tahay ama inaad naafo ahayn ama aad awoodo inaad shaqayso in inkale sabab la xariirta xanuun ama dhaawac. Wakaaladaada ayaa dhiibaysa qarashka ku baxaaya cadaynta caafimaadka.

Haddii aadan kuhadli karin afka Ingiriiska, waxaad xaq uleedahay in lagu keeno turjumaan jooga goobta dhagaysiga. Division of Hearings and Appeals ayaa dhiibi karta qarashaadka turjumaanka iyo turjumaanada hadaad codsato.

Siiwadida Gunooyinka

Haddii aad qaadatid guno oo aad weydiisay dhageysi kahor inta aysan gunooyinku isbadelin, waxaad joogteynta kartaa helida isla gunooyinkaas illaa madaxa dhageysigu gaaro go'aan.

Haddii madaxa dhagaysigu go'aansado in go'aanka in wakaaladaadu saxnayd, waxaad u baahan kartaa inaad dib u bixisid ama celisid gunooyinka dheeraadka ah ee aad heshay inta u dhaxeysa waqtiga aad weydiisay dhageysigaaga cadaalada ah iyo waqtiga madaxa dhagaysigu go'aanka kagaaro kiiskaaga.

Haddii aad codsatay dhagaysi cadaalad ah, waxaa wali lagaa doonayaa inaad buuxiso cusboonaysiino kasta oo horay uqorshaysnaa. Haddii wakaaladaadu kuusheegto kahor intaan dhagaysiga cadaalada ah aan laqaban in xiligaaga diiwanagalintu dhamaatay, waa qasab ah inaad markale codsato aadna buuxisaa dhamaan xeerarka barnaamijka ee gunooyinkaaga si laguugusii wado. Haddii csuboonay-siintaadu muujinayso in isbadalo kudhaceen xaaladahaaga, gunooyinkaaga ayaa isbadali kara ama dhamaan kara sababo la xariira isbadaladaan.

Saamaynada Dhagaysiga cadaalada ah

Haddii go'aanka dhagaysigu yahay mid maslaxad kuu ah, majirto wax talaabo ah oo ay wakaaladu kaa qaadayso. Haddii gunooyinkaaga lajooyiyay, dib ayaa laguugu bilaabayaa. Taariikhda aad bilaabi doonto qaadashada gunooyinka waxaa lagusoo qorayaa waraaqda aad hesho ee ka hadlaysa go'aanka dhagaysiga cadaalada ah.

Haddii dhagaysiga cadaalada ah lagu go'aansho si aan maslaxadaada ahayn, go'aanku wuu sii soconayaa, waxaan qasab ku ah inaad dib ubixiso gunooyin kasta oodan xaq ulahayn ood qaadatay. Wax kawaydii wakaaladaada xadiyada udagsan lacagaha gunooyinka ee aad dib u bixinayso.

Majiro talaabo kale oo lagaa qaadaayo sabab la xariirta inaad codsiga dhagaysiga cadaalada ah dirsatay.

Dib U dhagaysiga

Haddii aadan ku qancin go'aanka dhagaysiga cadaalada ah, waxaad xaq uleedahay inaad codsato dib u dhagaysiga dacwada hadii:

- Aad haysato cadayn cusub oodan ogayn ama hayn markii hore ee dhagaysiga laqabanaayay taasoo badali kartay go'aanka.
- Aad dareemayso inuu khalad kajiray macluumaadka laga go'aan qaatay.
- Aad dareemayso inuu khalad kajiray aasaaska sharci ee go'aanka.

Codsiga qoran ee dib u dhagaysiga dacwada waa in lagusoo gudbiyaa 20 maalmood gudahood kadib marka go'aanka qoran kasoo baxo dhagaysiga cadaalada ah. Division of Hearings and Appeals ayaa markaas kadib go'aan ka gaaraysa 30 maalmood gudahood marka codsiga qoran lasoo gaarsiiyo hadii lagu ogolaado inaad hesho dib u dhagaysiga dacwada. Haddii aan wakaaladu soosaarin jawaab qoran oo ku aadan codsigaaga 30 maalin gudahood, codsigaaga waa ladiiday.

Racfaan Kaqadashada Go'aanka Dhagaysiga ama Dib u dhagaysiga Dacwada

Haddii aadan ku qancin go'aanka dhagaysiga cadaalada ah ama dib u dhagaysiga, waxaa wali kuu furan inaad racfaan kaqaadato go'aankaan adoo ugudbinaaya maxkamad kutaala degmadaada. Arintaan waa in lagu sameeyaa 30 maalmood gudahood kadib markuu kusoo gaaro ogaysiiska qoran ee laxariira dhagaysiga cadaalada ah ama 30 maalin gudahood marka ladiido codsigaaga dib u dhagaysiga. Racfaan loodiyo maxkamada dhexdhexaadinta waa in lagu gudbiyaa ayoo dacwad diidmo ah loodirsanaayo karaaniga maxkamada degmadaada. Waxaa ugu habboon waa inaad hesho talobixin dhanka sharciga ah hadaad go'aasato inaad racfaan kaqaadato dhagaysiga cadaalada ah ood ugudbiso maxkamada dhexdhexaadinta.

Caawimaada Sharciga

Waxaa suuragal ah inaad caawimaad sharci kahesho Wisconsin Judicare, Inc., ama Legal Action of Wisconsin, Inc. (LAW). Si aad uhesho xafiiskooda kuugu dhaw:

- Kawac Judicare 800-472-1638, ama booqo barta www.judicare.org.
- Kawac LAW 888-278-0633, ama booqo barta www.badgerlaw.net.



Aruurinta iyo Adeegsiga Macuumaadka iyo Arimaha Sirta ah

Ogaysiinta Takoorka Kacaagan: Takoorku waa Fal Sharci Daro ah—Barnaamijyada La xariira Daryeelka Caafimaadka

Wisconsin Department of Health Services waxay ku dhaqmayso sharciyada xaquuqda madaniga ah cidnana uma takoorto sababo la xariira isir, midab, wadanka uu udhashay, da', naafonimo, ama jinsigiisa. Department of Health Services dadka uma saarto ama ulama dhaqanto si gaar ah sababo la xariira isir, midab, wadanka uu udhashay, da', naafonimo, ama jinsigiisa.

Department of Health Services:

- Waxay bixisaa gargaaro bilaash ah iyo adeegyo dadka naafada ah si ay si wax ku ool ah inoola xiriiraan, sida:
 - Calaamada u qalanta turjumaanada luuqada
 - Macluumaadka qoran oo qaabab kale (daabacaad waaweyn, dhageysi, qaababka korontada la geli karo, qaabab kale)
- Waxay bixisaa adeegyo luuqadeed oo bilaash ah oo loogu talagalay dadka luuqadooda koowaad aysan ahayn Ingiriiska, sida:
 - Turjubaanada u qalma
 - Macluumaad ku qoran luuqadaha kale

Haddii aad ubaahan tahay adeegyo, kala xariir iskuduwaha xaquuqda Madaniga ah ee Department of Health Services 844-201-6870.

Haddii aad aaminsantahay in Department of Health Services ay kufashilantay inay kusiiso adeegyadaan ama ay kuutakoortay qaab kale sababo la xariira isir, midab, wadanka uu udhashay, da', naafonimo, ama jinsigiisa, waxaad cabasho ugudbin kartaa: Department of Health Services, Attn: Civil Rights Coordinator, 1 West Wilson Street, Room 651, PO Box 7850, Madison, WI 53707-7850, 844-201-6870, TTY: 711, Fax: 608-267-1434, ama email udir dhscrc@dhs.wisconsin.gov. Waxaad kugudbin kartaa cabashada si toos ah ama boostada, fakiska, ama emailka. Haddii aad ubaahan tahay in lagaa caawiyo gudbinta cabashada, iskuduwaha xaquuqda madaniga ah ee Department of Health Services ayaa diyaar u ah inuu kucaawiyo.

Waxaad sidoo kale cabashada xaquuqda madaniga ah ugudbin kartaa U.S. Department of Health and Human Services, Office for Civil Rights, si oonleen ah adoo usii marsiinaaya Office for Civil Rights Complaint Portal, ood kahelayso <https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf>, ama boosto kudir ama kawac taleefanka:

U.S. Department of Health and Human Services
200 Independence Avenue, SW
Room 509F, HHH Building
Washington, D.C. 20201
1-800-368-1019, 800-537-7697 (TDD)

Foomamka cabashada waxaad kahelaysaa <http://www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html>.

Español (Spanish) ATENCIÓN: si habla español, tiene a su disposición servicios gratuitos de asistencia lingüística. Llame al 844-201-6870 (TTY: 711).	Deitsch (Pennsylvania Dutch) Wann du Deitsch (Pennsylvania Dutch) schwetzscht, kannscht du ebber griege as dich helfe kann mit Englisch, unni as es dich ennich eppes koschte zellt. Ruf 844-201-6870 uff (TTY: 711).
Hmoob (Hmong) LUS CEEV: Yog tias koj hais lus Hmoob, cov kev pab txog lus, muaj kev pab dawb rau koj. Hu rau 844-201-6870 (TTY: 711).	ພາສາລາວ (Laotian) ເຊີນຊາບ: ຖ້າທ່ານເວົ້າພາສາລາວ ແມ່ນມີບໍລິການຊ່ວຍເຫຼືອດ້ານພາສາ ບໍ່ເສຍຄ່າໃຫ້ທ່ານ. ໃຫ້ໂທຫາເບີ 844-201-6870 (TTY: 711).
繁體中文 (Traditional Chinese) 注意：如果您使用繁體中文，您可以免費獲得語言援助服務。請致電 844-201-6870 (TTY: 711)。	Français (French) ATTENTION : Si vous parlez français, des services d'aide linguistique vous sont proposés gratuitement. Appelez le 844-201-6870 (ATS : 711).
Deutsch (German) HINWEIS: Wenn Sie Deutsch sprechen, steht Ihnen kostenlos ein Sprachen-Service zur Verfügung. Tel.: +1 844-201-6870 (TTY: 711).	Polski (Polish) UWAGA: Jeżeli mówisz po polsku, możesz skorzystać z bezpłatnej pomocy językowej. Zadzwoń pod numer 844-201-6870 (TTY: 711).
العربية (Arabic) ملحوظة: إذا كنت تتحدث العربية، فإن خدمات المساعدة اللغوية تتوافر لك بالمجان. اتصل برقم 844-201-6870 (رقم هاتف الصم والبكم: 711).	हिंदी (Hindi) ध्यान दें: यदि आप हिंदी बोलते हैं तो आपके लिए मुफ्त में भाषा सहायता सेवाएं उपलब्ध हैं। 844-201-6870 (TTY: 711) पर कॉल करें।
Русский (Russian) ВНИМАНИЕ: Если вы говорите на русском языке, то вам доступны бесплатные услуги перевода. Звоните 844-201-6870 (телетайп: 711).	Shqip (Albanian) KUJDES: Nëse flisni shqip, për ju ka në dispozicion shërbime të asistencës gjuhësore, pa pagesë. Telefononi në 844-201-6870 (TTY: 711).
한국어 (Korean) 알림: 한국어 지원 서비스를 무료로 이용하실 수 있습니다. 844-201-6870 (TTY: 711) 번으로 전화해 주십시오.	Tagalog (Tagalog – Filipino) PAUNAWA: Kung nagsasalita ka ng Tagalog, maaari kang gumamit ng mga serbisyo ng tulong sa wika nang walang bayad. Tumawag sa 844-201-6870 (TTY: 711).
Tiếng Việt (Vietnamese) CHÚ Ý: Nếu bạn nói Tiếng Việt, có các dịch vụ hỗ trợ ngôn ngữ miễn phí dành cho bạn. Gọi số 844-201-6870 (TTY: 711).	Soomaali (Somali) FIIRO GAAR AH: Haddii aad ku hadashid af Soomaali, adeegyada caawinta luuqada, oo bilaash ah, ayaa lagu heli karaa. Soo wac 844-201-6870 (TTY: 711).

Bayaanka Takoor la'aanta ee USDA

Dhammaan barnaamijyada kale ee kaalmada nafaqada ee FNS, hay'adaha gobalka ama deegaanka, iyo hay'adaha la hawlgala, waa inay soo dhajiyaan Bayaanka Takoor La'aanta ee soo socda:

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salaysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), naafonimada, da'da, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.


Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay kala xidhiidhaan Hay'adda Gobalka ama deegaanka ee mas'uulka ka ah maamulka barnaamijka ama xarunta TARGET ee USDA lambarka (202) 720-2600 (cod iyo TTY) ama waa inay la xidhiidhaan USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta: <https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay, iyada oo la wacayo (866) 632-9992, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in loogu diraa USDA:

- (1) **boostada:**
U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410; ama
- (2) **fakiska:**
(833)256-1665 ama (202) 690-7442; ama
- (3) **emailka:**
program.intake@usda.gov.

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.

Ilaalinta Dhaqaalaha Ururada waka- aladaha iyo Wakaladaha Qabiilada





WISCONSIN DEPARTMENT
of **HEALTH SERVICES**

P-16091SO
(03/2023)